



Ref/ H/L/F 407/2020

Date: 2/5/2020

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Ku: Madaxwaynnaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Ku: Raiisul wasaaraha Xukumadda Federaalka Soomaaliya

Og: Wasiirka Wasaaradda warfaafinta XFS

**Ujeeddo: Cabasho Qoraal ah si waafaqsan faqradda 2aad qoddobka
20aad ee dastuurka Federaalka**

Hordhac

Aniga oo ah Qareen Daahir Maxamed Cali oo Qareen u ah hay'adaha warbaahinta gaarka loo leeyahay iyo ururada saxafiyiinta Soomaaliyeed oo kala ah: **Daladda warbaahinta Soomaaliyeed (Somali Media Association) (SOMA)**, **Ururka Suxufuyiinta Soomaaliyeed (Somali Journalists Syndicate) (SJS)**, **midawga Suxufiyiinta Soomaaliyeed (Federation of Somali Journalists) (FESOJ)**, **Daladda Xarumaha warbaahinta Madaxa-bannaan (Somali independent Media Houses Association) (SIMHA)** iyo ururka saxafiyiinta Gabdhaha soomaaliyeed (Somali Women journalist) (SWJO) waxaan halkaan ugu soo gudbinayaa madaxda warqadaani ku socto iyo kuwa ogaysiiska kulaba Cabasho qoraal ah si waafaqsan faqrada 2aad e qoddobka 20aad ee Dastuurka FKMG, Cabashadaas oo la xiriirta dhibaatooyin soo wajahay Saxaafadda madaxa bannaan ee Soomaaliya, dhibaatooyinkaas oo iskugu jira, xadgudubyo lidku ah badqabka saxafiyiinka, iyo ka gaabinta Xukumadda ee difaaca

**Dhismaha BIG GATE, ka soo horjeedka Daarta Binkuweeer, wada Via Roma, Degmada
Xamarweyne**

Muqdisho – Soomaaliya

Landline: 868380, +252612222872 +252615810048, +252615539570

E-mail: heeganlawfirm@gmail.com

iyoo ilaalinta saxafiyiinka madaxa bannaan, ishortaagga helidda macluumaadka Dawladda iyo Caburin guud oo lid ku ah xurriyadda hadalka iyo cabiraadda ra'yiga.

Dulucda Cabashada

Iyadoo ay aad u badanyihiin tacadiyada muuqda ee loo geysto saxafiyiinta kala duwan ayaan haddana waxaan halkaan kuugu soo koobaynaa tacadiyada ugu culus ee saxafiyiintu ka cabanayaan, tacadiyadaas oo ah kuwaan :

1- Ku xadgudubka badqabka saxafiyiinka iyo ka gaabitnta difaacooda,

Tusaale ahaan Sanadkii 2019, Waxaa dhacay dhacdooyinka:

A- 81 wariye ayaa la jir diley iyaga oo gudanaya waajibaadkooda.

B- Waxaa la xiray 53 suxufi

C- Saddex weriye ayaa la dhaawacay.

xadgudubyadaan Waxay ka soo horjeeda qoddobka 15^{aad} ee Dastuurka Federaalka KMG faqradihiisa 1^{aad}, 2^{aad} iyo 3^{aad} oo jiddeynaaya in Qof kastaa uu xaq u leeyahay xorriyaddiisa shakhsiga ah iyo nabagelyada qofnimadiisa, iyo in Qof kasta uu xaq u leeyahay badqabka jirkiisa, isla markaana uu reeban yahay xarig, jirdil iyo nooc kasta oo xadgudub qofeed ah, sidoo kale arrintaan waxay lid ku tahay faqrada 2^{aad} ee qoddobka 12^{aad} oo u qoran sidaan (**Waajibaadka Dawladdu kuma koobna in ay dhawrto xuquuqda dadka, balse waa in ay qaaddo tallaabooyin maangal ah oo lagu ilaalinayo in xadgudub uga yimaado cid kale**).

2- Ishortagga helidda Xogta iyo faaf-reebka wararka dawladda laga helo.

Dhibaatooyinka Saxafiyiintu ka cabanaayaan Waxaa ka mid ah in Xukumadda iyo laamaheeda kala duwan ay is hortaag ku sameeyaan saxafiyiinta, iskana hortaagaan helidda xogta iyo macluumaadka dawladda, si taa la mid ahna xogta dawladda iyo

Dhismaha BIG GATE, ka soo horjeedka Daarta Binkuweeer, wada Via Roma, Degmada Xamarweyne

Muqdisho – Soomaaliya

Landline: 868380, +252612222872 +252615810048, +252615539570

E-mail: heeganlawfirm@gmail.com

wararka loo soo diro iyada oo la jarjaray ama la soo faaf-reebay arrintaas oo lid ku ah qoddobka 32aad ee Dastuurka FKMKG gaar ahaan farqaddiisa 1aad oo u qoran sidaan (**Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo macluumaadka ay Dawladdu hayso**).

3- Cuburin guud oo lid ku ah Xurriyadda Saxaafadda

Dhibaatooyinka kale ee Saxafiyiintu ka cabanayaan waxaa ka mid ah cuburin guud, iyada oo loo hanjabo ciddii gudbisno warar aan dawladdu jeclaysan arrintaas oo ka soo horjeedda dastuurka federaalka KMG gaar ahaan qoddobka 18aad oo u qoran sidaan (**A- Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu yeesho, soo bandhigo ra'yigiisa iyo in uu doono, inuu helo oo gudbiyo ra'yigiisa, xog ama afkaar si kastaba.**

B- Xorriyatu qoolka waxaa ka mid, xorriyadda hadalka, saxaafadda iyo wax walba oo soo gelayawarbaahinta elektaroonikada iyo internet-ka)

Dhammaan xadgudubyadaan waxay lid ku yihiin dastuurka federaalka KMG, waxaana loo haayaa caddaymo dhamaystiran oo iskugu jiro qoraallo, muuqaallo, codad, sawirro iyo marqaatiyaal nool.

Haddaba, Waxaan kuu soo gudbinayaa Cabashadaan Qoraalka ah si waafaqsan faqrada labaad ee qoddobka 20aad ee DFKMGS oo dhahaysa (**Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu cabasho qoraal ah u gudbiyo hay'adaha Dawladda**), aniga oo rajaynaaya in arrintaan waxka qaba doontaan, aaminsanna in lagu dhamay karo hannaan aan garsoor ahayn lagana fursa karo intii suurtagal ah in Maxkamad lala aado

Wabilaahi Towfiiq

Qareen: Daahir Maxamed Cali



Dhismaha BIG GATE, ka soo horjeedka Daarta Binkuweeer, wada Via Roma, Degmada Xamarweyne

Muqdisho – Soomaaliya

Landline: 868380, +252612222872 +252615810048, +252615539570

E-mail: heeganlawfirm@gmail.com